DSHS WASHINGTON STATE Department of Social and Health Services

Office of Refugee and Immigrant Assistance (ORIA)

Oggolaanshaha Lagu Sii Deynayo Macluumaadka

Authorization to Release Information

Aniga oo ah, _____ (Magaca Macmiilka), waxaan oggolahay in aad macluumaadkeyga siiyo _____ (Adeeg-Bixiye) si aan adeegyo u helo, waxaanna u oggolaanayaa in ay macluumaadkeyga la wadaagaan Xafiiska Washington ee Caawimaadda Qaxootiga iyo Muhaajiriinta ee hoostaga Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka. Waxaan qirayaa in macluumaadkan lala wadaagi karo bixiyeyaasha adeegyada kale ee ay maalgeliso ORIA, iyo in ORIA uu u gudbin karo macluumaadkeyga Xafiiska Dib-u-dejinta Qaxootiga ee Mareykanka (ORR) ee hoostaga Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, sida ay farayaan siyaasadaha federaalka. Macluumaadkeyga la wadaagi karo waxaa ka mid noqon kara, balse aan ku koobnayn xogta aasaasiga ah ee dadka, macluumaadka xiriirka, iyo xaaladda socdaalka. Macluumaadkeyga waxaa kaliya loo wadaagi doonnaa isku-dubbaridka iyo caawimaadda helitaanka adeegyo luuqado badan leh oo dhaqan ahaan habboon, iyo in macluumaadkeyga loo gudbiyo ORR. Macluumaadkeyga waxaa loo wadaagi karaa qof ahaan, email ahaan ama elektaroonik ahaan, ama boostada ayaa lagu wadaagi karaa.

Fadlan ogow: Haddii diiwaannadaada macmiilka ay ku jiraan wax ka mid ah macluumaadkan soo socda, waa in aad qaybtan buuxisaa si loogu daro diiwaannadan:

Waxaan bixinayaa oggolaanshaheyga si loo sii deeyo diiwaanadan soo socda (calaamadee dhammaan kuwa la adeegsan karo):

☐ Caafimaadka dhimirka ☐ Natiijooyinka baaritaanka cudurrada HIV/AIDS iyo STD, oggaanshaha cudurka, ama daaweynta

☐ Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha

Fadlan calaamadee mid ka mid ah kuwan soo socda:

☐ Uma baahni adeegyo tarjumo afka ah (afcelin), waxaanna akhriyey foomkan oggolaanshaha si buuxdana waan u fahmay.

☐ Foomkan waxaa ii akhriyey turjumaanka lambarkiisu / magaciisu yahay _____. Qofkan ama hay'addan waxay si fiican ugu hadlaan Af-Ingiriisiga iyo luuqaddeyda hooyo, waxaanna si buuxda u fahmay oggolaanshaha.

- Oggolaanshahan sii-deynta macluumaadku wuxuu shaqeynayaa muddo hal sano ah laga bilaabo taariikhda la saxiixay ama ilaa _____.
- Waxaan xaq u leeyahay in aan ka noqdo ama joojiyo oggolaanshahan sii-deynta waqti kasta anigoo qoraal ku sameynaya, balse taasi saameyn kuma yeellan doonto macluumaad kastoo hore loo wadaagay.
- Nuqulka foomkan ayaa ansax ah oo bixinaya fasaxeyga wadaagista diiwaannada.

Saxiixa Macmiilka / Wakiilka Macmiilka Taariikhda	Lambarka Kiiska ama Lambarka Shisheeyaha ee Macmiilka
Saxiixa Waalidka ama Mas'uulka Sharciga ah Taariikhda	Saxiixa Shaqaalaha Bixiyaha Adeegga Taariikhda

Ogeysiis ku socda Dadka Macluumaadka Helaya: Haddii diiwaanadan ay ku jiraan xog ku saabsan fayruska HIV, Cudurada Galmada la isaga gudbiyo (STDs), Ama Aydhis (AIDS), waxaa laga yaabaa in aadan xogtaasi sii sheegin la'aanta oggolaanshaha gaarka ah ee macmiilka. Haddii aad heshay macluumaad la xiriira isticmaalka daroogada ama khamriga ee macmiilka, waa in aad ku dartaa bayaankan soo socda marka aad macluumaadka sii gudbinayso sida uu qabo xeerka 42 CFR 2.32:

Macluumaadkan waxaa lagaaga soo siidaayey diiwaano ay ilaalinayaan Sharciyada qarsoodi ahaanta dowladda dhexe (42 CFR part 2). Sharciyada Federaalka waxay kaa mamnuucayaan in aad ku sameysid sii dayn kale oo dheeri ah macluumaadkan haddii sii dayn dheeri ah si cad loogu oggolaaday oggolaanshaha qoraalka ah ee qofka arrinta ay khuseysa ama haddii kale lagu oggolaaday sharciga 42 CFR qaybta 2. Oggolaansho guud oo loogu talogalay sii daynta macluumaadka caafimaadka ama macluumaad kale ma AHAN mid ku filan ujeeddadan. Sharciyada Federaalka waxay xaddidayaan isticmaal kasta ee ah macluumaadka si dambi ahaan loo baaro ama dambi loogu soo oogo bukaan ku xadgudbey daroogo ama khamriga.